GURYAHA GAARKA LOO LEEYAHAY

Casumaad ku saabsan dib u habayn

Turjumaadaha: www.poseidon.goteborg.se/hyresgast/ombildning

عربي
Arabiska

English
Engelska

Soomaali
Somaliska

Bosanski
Bosniska



Guryaha gaarka loo leeyahay (Bostadsrätt) inaad iibsato waxay ku siinaysaa fursado aad ku saamayn kartid guriga aad degantahay

Shirkada Poseidon waxa loo xil saaray ina ay suurta- geliso qaabab kale duwan oo loo degaanan karo guryaha. Sidaa darteed waxa aanu ku casuumaynaa guryo kooban oo la soo xulay inay iibsadaan/gataan dadka guriyaha ay hadda kirada ugu jiraan. U jeedada ayaa waxa ay tahay inay ka jiraan Hjällbo habab kale duwan oo la kala dooran karo, hadii qofku rabo inuu gurigiisa iibsado.

In la deganaado guri xuquuqda lahaanshaha la leehayahay waxay micnaheedu tahay in la iibsado oo la lahaado gurigaaga taas oo wadajir loola sameynaayo dadka deriskaaga iyadoo loo soo maraayo urur guryaha xaquuqda lahaanshaha la leeyahay ah. In laga mid noqdo u bedelaada ayay micnaheedu tahay fursad shuruudo wanaagsan gurigaaga loogu iibsanaayo. Kireyste ahaan ayaad gurigaaga ku iibsan kartaa qiimo ka hooseeya qiimaha suuqa laga filayo. Sidoo kale uma baahnid inaad bixisid lacag kaash ah oo aad sii dhigto taas oo aad u baahan tahay inaad sameyso markaad guryaha xuquuqda lahaanshaha la leeyahay ka iibsaneyso suuqa furan. Waxaan anagu haddii aanu Poseidon nahay dabcan jecel nahay xuquuqda kireysiga iyadoo aanu wali Hjällbo ku sii lahaan doonaa guryo badan. Laakiin guryaha xuquuqda lahaanshaha la leeyahay waxay leeyihiin faa'iidooyin kale.

Kuwani waa qaar ka mid ah faa'iidooyinka:

- Waxaad helaysaa fursad ka weyn oo aad adigu ugu saameynayso gurigaaga.
- Waxa guriga wadajir u wada leh adiga iyo deriskaaga waxaadna si wada jir ah ugu saameyn kartaa sidaad ururkiina ugu rabtaan.
- Waxaad saameynaaya kharashka hoygaad degantay ku baxaaya adigoo dib u bixinaya amaahdaada ka dibna dhimaaya kharashaadka.

Haddii aad rabto inaad guurto, ayaad guriga ku iibin kartaa qiimo uu suuqa ka taagan yahay.

Dabcan, waxa sido kale jira khataro ay iibsashada gurgaagu leedahay. Qiimaha uu suuqa ka taagan yahay ayaa is bedeli kara waqti ka dib iyadoo qiimaha gurigaaguna uu kordhi karo uuna hoos u dhici karo.

Sida ay u shaqeysaa

Talaabada 1 – Macluumaad

Waxaan anagu haddii aanu Poseidon nahay kugu martiqaadi doonaa kulan iyo wadahadal si aan kuugu sheegno wax dheeraad ah oo ku saabsan waxa ay tahay dhisida urur kireyste.

Tallaabada 2 - Sameeya urur-kirayste

Haddii adiga iyo deriskaagu aad danaynaysaan inaad guriga iibsataan ayaad samaysanaysa urur iskaashato kireysi. Waxa loo baahan yahay ugu yaraan saddex xubnood si loogu dhiso guddi ku meel gaar ah.

Talaabada 3 – Baaritaan

Dhismaha ayaa la eegayaa iyadoo qiimaha la dejinaayo. Qof hubiye/kantaroole ah oo madaxbanaan ayaa eegi doona guriga isagoo qiimeyn doona xaalada wuxuuna sameyn doonaa qorshe dayactir oo sanadaha soo socda ah. Guryaha ayuu qof ogolaansha u haysta qiimeyntu sameyn doonaa qiimeyn iyadoo xisaabtana loo soo bandhi doono dadka deggan. Markaas ka dib ayaa la sameynayaa qorshe maaliyadeed oo dhismaha ku saabsan.

Tallaabada 4 - Shir/Kulan weyn

Xubnaha ururka ayaa go'aan u bedelida ah gaaraaya iyagoo u kala codeynaaya haddii ay KU RAACSAN yihiin ama KA SOO HOR JEEDAAN.

Tallaabada 5 - Maalgelinta

Shirka ka dib ayaa dadka kiraystayaasha ah ee doonaaya inay gurigooda iibsadaan ay dhaqaalahooda diyaarsan doonaan iyagoo haysta deynta guryaha ee loo ogolaaday.

Tallaabada 6 - Gelitaanka

Ururku ayaa dhismaha iibsanaaya oo raadsanaaya diiwaangelinta lahaanshaha sharci ahaaneed ee hanti ma guurto ah. Waxa caadi ah in bangigu hawshaas galo oo ay qaadato ilaa bil in la helo diiwaangelinta lahaanshaha sharci ahaaneed ee hantida ma guurtada ah.

Waxaanu ka jawaabeynaa su'aalahaaga!

Waxaanu kugu soo martiqaadi doonaa wadahadal iyo kulan halkaas oo aad su'aalo ku weydiin karto.

Su'aalo iyo jawaabaha caadi ahaan la is weydiiyo

Waa ayo cida go'aamineysa haddii u bedelaada la sameynaayo?
Sidaa waxaa sameynaaya dadkiina kireystayaasha ah ee guriga ku nool. Si uu iibku u noqdo mid suurtogal ah waa in ugu yaraan saddex meelood laba (67%) dadka kiraystayaasha ahi ay rabaan oo ay awoodaan inay iibsadaan guryahooda.

Ma inaan aqalka iibsadaa marka u bedelaada la sameeyo?
Maya, qofka kireyste ayaa xaq u leh inuu kireyste ahaan u sii deganaado.

Sidee ayay Poseidon ugu xulatay guryaha loo soo bandhigi doono?
Waxaanu soo xulnay isku geyn ahaan ilaa 400 guri oo Hjällbo ku yaala oo la siin doono u bedelaada. Waxaanu dooranay guryo aan lahayn baahiyo dayactir oo aad u waaweyn, oo farsamo ahaan noqon kara in lagu bedelo oo ku yaala meelo kala duwan oo deegaanka ka mid ah.

Muxuu noqon doonaa qiimaha gurigu?
Qiimaha ilaa hadda lama goynin. Waxaad macluumaad qiimaha ku saabsan ka heli doontaa wakhti fiican ka hor intaan go'aan la gaarin. Iibsashada guri kiro ah markay u beddelaad timaado ayay micnaheedu tahay in gurigu lagu helo qiimo ka hooseeya inta lagu qiyaasaayo qiimaha uu suuqa ka joogo haddii guriga gaar ahaan lagu iibin lahaa.

Guryaha xuquuqda lahaanshaha leh ma in kiro la bixiyaa?
Maya, laakiin marka lagu daro amaahda shakhsi ahaaneed ee guriga aad ka bixineyso, waxa loola jeedaa ribada iyo qey-qeyb u bixin lacag deyn ah, ayaa khidmad bille ah la siiyaa ururka. Khidmadu waa inay kafeysaa kharashka amaahda ee ururka iyo kharashka hawl wadista, dayactirka, hagaajinta iyo canshuurta guryaha. Waxaad rabto inaad gurigaaga dhexdiisa ku sameysatid ayaad adiga iska bixinayasaa.

Ayaa daryeeli doona guriga intiisa kale haddii aan anigu gurigeyga iibsado?
Ururku ayaa si wada jir ah guriga oo dhan u maamulaaya. Waxa caadi ah in ururku adeegyo ka iibsado sida maaraynta guryaha, nadiifinta qeybaha jaranjarta, baraf ka gurista iyo waxyaabo kale shirkad la shaqeysa maamulka ururada milkiilayaasha kiraystayaasha.

Goorma ayay tahay inaan go'aan gaaro?
Waxaan dhamaan dadka kireystayaasha ah ku soo martiqi qaadi doonaa wadahadal iyo kulan. Waa shirka meesha ugu horeysaa ee aad u baahan tahay inaad go'aan ku saabasan inaad iibsameyso iyo in kale gaarto ku gaarto.

Intee inleeg ayuu habka loo sameynayaa qaadanayaa?
Way adag tahay in la sheego, laakiin laga bilaabo samaynta ururka kireystayaasha illaa dib haddii ay dib u bedelaadu timaado ayay badanaa qaadataa qiyaastii hal sano.

Bostads AB Poseidon
poseidon.goteborg.se
031-332 10 00

Ka tirsan Göteborgs Stad